Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo: Wakhtiga Maamulka ee loogu talagalay Shaqaalaha Daryeelka Guriga, Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah, iyo Adeegayaasha Daryeelka Gaarka ah

Waa maxay sababta lacagta la iigu siiyo 15 daqiiqadood oo dheeraad ah xilli kasta oo lacag-bixineed?

Laga bilaabo Janaayo 2025, waxaad xaq u yeelan doontaa in lacag lagugu siiyo 15 daqiiqadood oo dheeraad ah xilli kasta oo lacag-bixineed ee wakhtiga maamulka (Wakhtiga Maamulida). Dheeftaan waxaa ka wada xaajooday Gobolka iyo SEIU, Local 503 waxaana lagu daray Heshiiska Gorgortanka Wadareed (CBA) ee 2023-2025. Waa waxa lagu aqoonsanayo wakhtiga aad ku bixinayso duubista iyo soo gudbinta wakhtigaaga si lacag laguugu siiyo. Tani waxaa loo yaqaanaa wakhtiga maamulka. Tani waxaa loo yaqaanaa wakhtiga maamulka.

Waxaad CBA ka heli kartaa websaydka intarnet-ka ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon: https://www.oregon.gov/odhs/providers-partners/homecare-workforce/Documents/2023-2025-seiu-ohcc-contract.pdf

Dheeftan waxaa la heli karaa ilaa Juun 30, 2025.

Goormee ayuu bilaabanayaa Wakhtiga Maamulida iyo Lacag-bixinta?

Shaqaalaha daryeelka guriga iyo adeegayaasha daryeelka gaarka ah: Tani waxay la bilaabanaysaa mudada lacag-bixinta ee 1/12/25 - 1/25/25.

Shaqaalaha taageerada gaarka ah: Tani waxay la bilaabanaysaa mudada lacag-bixinta ee 1/16/25-1/31/25.

Oregon Department of Human Services

DHS 839591 (1/2025) Somali

Miyay tahay inaan wax sameeyo si aan u sheegto Wakhtiga Maamulida?

Maya. Uma baahan doontid inaad geliso sheegasho ku aaddan Wakhtiga Maamulida iyadoo loo marayo eXPRS ama OR PTC DCI. Waxaa si toos ah lagu siin doonaa lacagta 15-ka daqiiqadood ee dheeraadka ah.

Shaqaalaha taageerada gaarka ah: eXPRS waxay si toos ah u soo saari doonaan hal Sheegasho Lacag-bixin Maamulid oo loogu talagalay wakhti kasta oo lacag-bixineed oo aad geliso islamarkaana aad soo gudbiso wakhti waxayna siin doonaan xaanshida wakhtiga Hay'adda Maaraynta Kiiska (CME).

Imisa ayaa la iigu siiyaa Wakhtiga Maamulida?

Wakhtiga Maamulida waxaa lagu bixiyaa sicirka ugu hooseeya ee salka ee laga helo Daba-darka A ee Heshiiska Gorgortanka Wadareed ee 2023-2025. Laga bilaabo Janaayo 2025, sicirka ugu hooseeya ee salka waa $20 saacaddiiba. **Muhiim ah in la ogaado:** Tallaabooyinka ama kala duwanaanshayaasha dheeraadka ah **ma** khuseeyaan mushaharka maamulka.

Hal saac waxay ka kooban tahay afar 15-daqiiqadood oo dheeraad ah. 15-daqiiqadood oo dheeraad ah ayaa sida caadiga ah loo muujiyaa sida .25 (60 daqiiqadood oo loo qaybiyay afar 15-daqiiqadood oo dheeraad ah).

Qaacidada la isticmaalay si loo xisaabiyo mushaharka maamulka ka hor canshuurta (qadarka saafiga ah) waa:

Sicirka ugu hooseeya ee salka loo qaybiyay 4.

Tusaale: $20 oo loo qaybiyay 4 waxay la mid tahay $5 canshuuraha ka hor.

Imisaa ayuu la le'eg yahay Wakhtiga Maamulida ee aan u qalmo in aan helo xilli lacag-bixineed kasta?

Shaqaalaha daryeelka guriga iyo adeegayaasha daryeelka gaarka ah: Waxaad xaq u leedahay Wakhtiga Maamulida 14-maalmood xilli kasta oo lacag bixin ah.

Shaqaalaha taageerada gaarka ah: Waxaad xaq u leedahay Wakhtiga Maamulida laba jeer bishiiba: The 1da ilaa 15^{ka} iyo 16^{ka} ilaa dhammaadka bisha.

Wakhtiga Maamulida miyaa lagu xisaabiyaa saacado dheeraad ah ama mushaharka fasaxa?

Maya. Wakhtiga Maamulida laguma daro xisaabinta saacadaha dheeraadka ah ama mushaharka fasaxa.

Miyaan helayaa Wakhtiga Maamulida ee qof kasta oo aan u shaqeeyo?

Maya. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho 15 daqiiqadood oo Wakhtiga Maamulida ah xilli kasta oo lacag-bixineed iyadoo aan loo eegin tirada macaamiisha aad u shaqayso.

Waxaan ahay HCW, PSW, iyo PCA. Imisaa ayuu le'eg yahay Wakhtiga Maamulida ee aan u qalmo in aan helo?

Waxaad xaq u leedahay in aad ku hesho 15 daqiiqadood nooc kasta oo bixiye marka aad shaqeyso oo mushahar laguugu siiyo sida adeeg bixiyaha noocaas ah inta lagu jiro xilliga lacag-bixinta. Tani waxay la macno tahay, waxaad heli kartaa ilaa 45 daqiiqadood oo Wakhtiga Maamulida ah haddii aad u shaqayso mushaharna laguugu siiyo HCW, PSW, iyo PCA ahaan isla muddada lacag-bixinta.

DHS 839591 (1/2025) Somali

Sidee ayaan u gelin karaa wakhtigayga si aan u xaqiijiyo in lacag la iigu siiyo Wakhtiga Maamulida?

Shaqaalaha daryeelka guriga iyo adeegayaasha daryeelka gaarka ah: Geli oo ku soo gudbi wakhtigaaga OR PTC DCI maalin kasta oo la shaqeeyay inta lagu jiro muddada lacag-bixinta. Gelinta wakhtiga waa inuu dhacaa wakhtiga gelinka shaqadaadu bilaabmayso ayna dhamaanayso ee OR PTC DCI. Tani waxay kaa caawinaysaa hubinta inaad hesho qadarka ugu badan ee Wakhtiga Maamulida ee la heli karo, lagu bixiyo wakhtigiisa, ayna u hogaansamaan shuruudaha Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV).

Shaqaalaha taageerada gaarka ah: Geli oo u soo gudbi wakhtigaaga, oo ay la socdaan xaashida wakhtigaaga CME xilli kasta oo lacag-bixineed marka ay dhacdo. Tani waxay xaqiijinaysaa in aad hesho Mushaharka Maamulidaada ee ku aadan xilliyada lacag-bixinta labadaba bil gudaheeda.

Goormee ayaan arki doonaa lacag-bixinta ku aadan Wakhtiga Maamulida?

Wakhtiga Hawl-socodsiinta lacag ayaa lagu qaataa oo la bixiyo xilliga la qaato mushaarka loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga iyo adeegayaasha daryeelka gaarka ah. Wakhtiga Hawl-socodsiinta lacag ayaa lagu qaataa oo la bixiyo kadib xilliga mushaarka loogu talagalay shaqaalaha taageerada gaarka ah. Tusaale ahaan:

Shaqaalaha daryeelka guriga iyo adeegayaasha daryeelka gaarka ah: Wakhtiga Hawl-socodsiinta ee xilliga mushaareedka 1/12/25-1/25/25 waxaa la bixin doonaa markii la gaaro 2/5/25 taariikhda la bixiyo mushaarka.

Shaqaalaha taageerada gaarka ah: Wakhtiga Maamulida ee 1/16/25-1/31/25 waxa la bixin doonaa markii la gaaro 2/14/25 taariikhda shaqo gelinta lacag-bixinta.

DHS 839591 (1/2025) Somali

Sidee ayaan ku ogaan karaa in mushahar la iigu siiyay Wakhtiga Maamulida?

Shaqaalaha daryeelka guriga iyo adeegayaasha daryeelka gaarka ah: Awoodi uma yeelan doontid inaad ku aragto Wakhtiga Maamulida gudaha OR PTC DCI. Waxaad ku arki doontaa Taladaada Xawaalada sida xeerka habraaca (Proc) **ORAP1**. Unugu wuxuu noqon doonaa .25.

Shaqaalaha taageerada gaarka ah: Waxaad Sheegashooyinka Lacag-bixinta Maamulida ka arki kartaa barta eXPRS. Waxa lagu heli karaa iyadoo la raadinayo sheegashooyinka haysta Walxaha Adeegga, Xeerka Habraaca, iyo Xeerka Wax-ka-beddelka: **SE146/ORAP1/NA**. Jeegaaga mushaharka ee laga bixyo Public Partnership, LLC (PPL), waxaad u arki doontaa tan iyadoo loo soo bandhigay sida “Mushaharka Maamulka.”

Miyaa canshuuraha laga jaraa Wakhtiga Maamulida?

Wakhtiga Maamulida waxaa loo tixgaliyaa dakhliga iyo mushaharka la canshuuri karo kaas oo lagu soo sheegi doono W-2.

Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon barta OHCC.CustomerRelations@odhs.oregon.gov ama wac 877-867-0077. Waannu qabanaa dhammaan wicitaanada gudbinta ama waxaad wici kartaa 711.

Oregon Department of Human Services

DHS 839591 (1/2025) Somali